

DIBELS iyo IDEL

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinka qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

DIBELS swaxay utaagan tahay Cabirada Isbadbadala ee Xirfadaha Aqoonta Luuqada Caruurta Aasaasiga u ah. Waa system lagu fuliyo qiimayn gar ah kaasoo adeegsada hanaano dhawr ah iyo cabiro loogu talagalay in lagu cabiro hormarka ardayga ee barashada xirfadaha luuqada xili hore lagasoo bilaabo Fasalka koobaad ee fasalka lixaad. Xirfadaha lacabiraayo waxaa kamid ah aqoonta kala saarista dhawaqyada erayada, kudhawaqista, aqoonta, iyo fahanka. Araydu waxay sameeyaan imtaxaanada ayadoo laga raacaayo heerarkooda fasalka iyo waqtiga sanadka ee lagu jiro.

IDEL, Indicadores Dinámicos del Éxito en la Lectura, waa taxanayaal imtaxaan naqshadeed loogu talagalay in lagu cabiro xirfadaha aasaasiga u ah aqoonta luuqada ee caruurta baranaaya akhriska luuqada Isbaanishka ah. Cabirada IDEL maaha turjumaada DIBELS, inkastoo ay kudhisan yihiin isla cadaynta cilmi barista soo martay ee ku aadan sida caruurta ubartaan akhriska luuqada alifbeetada leh. IDEL waxay sidoo kale diirada saartaa qaan dhismeedka luuqadeed ee luuqada Isbaanishka ayna kujiraan dhawaqyada xarfaha, hinkaada, iyo laxanka. Cabiradu waa kuwo heer caadi ah, kooban, si gaar ah loo sameeyo, waxaana loo adeegsan karaa si joogto ah si loogu muraaqabeeyo kobaca xirfadaha luuqada Isbaanishka ee caruurta. IDEL waxay cabirtaa xirfadaha dhamaan qaybaha maadooyinka muhiimka ah ee biloowga akhriska ayna kujiraan: aqoonta dhawaaqa erayada, boosaska ay kalaleeyihiin alifbetooyinku, saxnaanta iyo aqoonta qoraalka la akhrinaayo, eray bixinta iyo fahanka. IDEL waxay sidoo kale qiimaysaa waraaq ku astaynaysa aqoonta luuqada khatar kale oo jirta.

Labaduba imtaxanada DIBELS iyo IDEL waa imtaxaano lagu aqoonsaday Sharciga Colorado ee READ (Akhriska) waxaana loo adeegsadaa in lagu cabiro heerarka guusha ee akhriska ardayda iyo hormarka ay sameeyaan, in lagu baaro ciladaha dhanka akhriska ee ardayda, iyo in labadalo qaabka casharada loo siiyo. Macluumaadka aadka loosoo dhiraan-dhiriyay ee DIBELS iyo IDEL waxaa loo adeegsan karaa in la abuuro qorshaha caawimaada yoolka leh ee dhanka akhriska (Qorshayaasha READ) si loogu taageero ardayda heerkooda akhrisku aadka uga hooseeyo heerka fasalka.



XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Sida kucad sharciga Colorado READ, dhamaan ardayda dhigata fasalada K-3 waa in lagu imtaxaanaa qiimaynta akhriska ee Gudigga Gobalku aqoonsanyihiin inta lagu jiro xiisadaha gaarka ah ee imtaxaanka. Imtaxaanada xiisadaha Sharciga READ waxaa lasameeyaa lix asbuuc xiliga dayrta, bartamaha sanadka, iyo xiliga gu'ga. Ardayda dugsiga barbaarinta waxay leeyihiin 30 maalmood oo dheeri ah si ay ugu dhameeyaan qiimaynta. Sida uuqabo sharciga gobalku, ardayda dugsiga barbaarinta ilaa fasalka sadexaad kuwaasoo keena heerka kahooseeya karitada aqooneed ee laga rabo waxay ubaahan yihiin inay maraan hal ilaa labo qiimayno dheeri ah si looxaqiijiyo heerkooda akhrinta.

Qaybaha Imtaxaanka Sharciga READ:

Fasalka k – 12	Dabayaaqada Agoso – Dabayaaqada Oktoobar	Dayrta
Fasalka k – 12	Diseembar – Bartamaha Feebaraayo	Bartamaha Sanadka
Fasalka k – 12	Maajo	Gu'ga

Maalmaha imtaxaanka laqaadaayo ayaa kaladuwanaa kara ayagoo kuxiran dugsiga. Si aad uhesho macluumaadka maalmaha gaarka ah ee ardaygaagu imtaxaanka galaayo, fadlan waydii macalinka cunugaaga.



WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

DIBELS iyo IDEL waxay qeexayaan natiijooyinka dhanka aqoonta ee soosocda ee ardayda intay kujiran sadex xili oo laqaado imtaxaanka Sharciiga READ (fadlan hoos kafiiri)

1. Kasareeya Heerkii larabay – Ardayda keena buundo kasaraysa heerka fasalkooda
2. Ku'eg Hkii larabay – Ardayda keena buundo kusiman heerka fasalkooda
3. Kahooseeya Heerkii Laga rabay/Xeeladii larabay – Ardayda keena heer kahooseeya kan fasalka una baahan in caawimaad lasiiyo
4. Wax badan kahooseeya Heerkii larabay/Aad uga hooseeya – Ardayda kenay buundada aadka uga hoosaysa heerka fasalka una baahan gacan siin degdeg ah, oo adag.

Si aad uhesho macluumaadka gaarka ah ee buundada ardaygaaga, fadlan waydii macalinka cunugaaga



SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Buundooyinka ardaydu kakeenaan imtaxaanada DIBELS iyo IDEL waxay macluumaad kasiyaan dugsiga in ardaygu uu hayo wadadii uu heerka fasalka dugsigiisa guul uga keeni lahaa akhriska iyo inkale. Dugsigu wuxuu si degdeg ah u aqoonsanayaa ardayd aan buuxin yoolka laga rabo imtaxaan kasta wuxuuna siinayaa caawimaad dheeri ah. Tusaale ahaan, hadii cunugaagu uu erayada si sax ah u akhrinaayo, laakiin uu si gaabis ah u akhrinaayo, macalinka ayaa siin kara murajacayn dheeri ah si uu ugu celceliyo sheekooyinka iyo qoraalada si uu ukobciyo heerkiiisa akhriska ama aqoonta luuqada. Macalinka ayaa adeegsan kara buundooyinka lasocoshada hormarka ardayga si uu uxaqiijiyo in ardaygaagu helo caawimaad dheri ah si kor loogu qaado xirfadaha kale ee akhriska inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Macalimiinta ayaa dib u eegis kusamayn kara buundooyinka imtaxaanada dhamaan ardayda kujira fasalka si ay go'aano uga gaaraan sida ay udiyaarinayaan casharada maalinlaha ah ee akhriska.



WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

Wixii macluumaad dheeri ah: Qiimeynada

Booqo:

- assessments.dpsk12.org

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.